

Tallaalista oo la dardargelinayo

Waxa loo baahan yahay in degdeg loo kordhiyo dadka lagu tallaalayo irbad xoojin ah. Dawladdu waxa ay hadda Ciidanka Qaranka ka codsanaysaa in ay gacan siiyaan degmooyinka u baahan in laga caawiyo tallaalista. Waxa islamarkaana degmooyinka u fududdaan doona in farmasiiyadu ka caawiyaan tallaalista dadka.

– Waxa yoolku yahay in qof kasta oo 45 sano ka weyn loo fidiyo irbad xoojin ah ka hor dhammaadka toddobaadka 2-aad, waa badhtamaha Janaayo. Si yoolkaas loo gaadho, waxa la isticmaalayaa farsamooyin cusub. Degmooyinku shaqo wacan ayay qabteen, laakiin cadaadis xoogan ayaa saaran. Dawladdu waxa ay Ciidanka ka codsanaysaa in ay dhisaan koox degmooyinka ka caawin karta tallaalista. Dad is-xilqaamay, dhakhaatiirta ilkaha, shaqaalaha xafiisyada caafimaadka ee shirkadaha iyo shaqaalaha caafimaadka ee isbitaallada ayaa gacan siin kara kooxda noocaas ah, ayuu yidhi raysalwasaare Jonas Gahr Støre (AP).

– Tallaalku naf ayuu badbaadiyaa. Dadka hadda isbitaallada la dhigo waxay u badan yihiin dadka aan is tallaalin iyo waayeelka qaatay labo irbadood oo keliya. Arrintaasi waxay caddaynaysaa muhiimadda ay leedahay in dadku qaataan irbadda xoojinta ah ee tallaalka ee loo fidiyo. Waxannu filaynaa in irbadda xoojinta ahi qofka ka difaacayso cudurka daran, xataa nooca omikoroonka, ayay tidhi wasiirka caafimaadka iyo daryeelka, Ingvild Kjerkol (Ap).

Waxa hadda ugu muhiimsan in la tallaalo dhammaan dadka 65 sano ka weyn, dadka u dhexeeya 18-64 sano ee aad ugu nugul in ay aad ugu bukoodaan covid-19, iyo shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka. Irbadda xoojinta ah ee la siinayo shaqaalaha caafimaadku waa lagama maarmaan si loo difaaco shaqaalaha caafimaadka, iyo bukaanka ay caawinayaan. Dawladdu waxa ay islamarkaana degmooyinka ka codsanayaa in ay mudnaanta siiyaan shaqaalaha iskuullada iyo

xannaanooyinka carruurta ee 45 sano ka weyn ka dib marka ay dhammeeyaan tallaalista dadka nugul ee 65 sano ka weyn.

– Farmasiiyadu waxay muujiyeen in ay diyaar u yihiin in ay gacan ka geystaan tallaallista. Waxa hadda la fududdaynayaa wadashaqaynta degmooyinka iyo farmasiiyada oo waxa la samaynayaa heshiis caadi ah oo degmooyinku isticmaali karaan haddii ay u baahdaan. Hadda waxa degmooyinka u fududdaanaysaa inay farmasiiyada isticmaalaan marka ay tallaalayaan dadkooda, ayay tidhi Kjerkol. Islamarkaana waxa la beddelayaa wakhtiga ugu yar ee u dhaxayn kara irbadda labaad iyo irbadda xoojinta ah oo waxa 4,5 bilood looga dhigayaa dadka 45 sano ka weyn, dadka 18 sano ka weyn ee aad ugu nugul inay covid-19 si weyn ugu xanuunsadaan iyo shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka. Machadka Caaafimaadka Dadweynaha (FHI) ayaa tallaal dheeraad ah diraya kirismaska ka hor si degmooyinku u tallaali karaan dhammaan dadka ka weyn 45 sano ee 4,5 bilood u dhexeeyaan xilligii irbadda labaad iyo xilliga irbadda xoojinta.

– Waxan islamarkaana xasuusinnayaa muhiimadda ay leedahay in shaqaalaha caafimaadku dhakhso u helaan irbadda xoojinta ah. Waxa ka mid ah kuwa adeegyada caafimaadka ee degmooyinka iyo kuwa adeegyada caafimaadka ee takhasuska ah. Waxan islamarkaana dadka aan weli qaaddan irbadda koowaad ama ta labaad si weyn ugu boorinnayaa in ay is tallaalaan. Degmooyinku si weyn ayay uga hawlgaleen tallaalista dadka, haddana maadaama nooca omikoronku yimi waxa sii weynaaday muhiimadda ay shaqadani leedahay, ayay tidhi Ingild Kjerkol oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.